



Community Relations Service ((CRS, Adeegga Xariirka Bulshada)
ee U.S. Department of Justice (Waaxda Cadaalada Maraykanka)

Kahortaga iyo Gurmada ku aadan Dhacdooyinka Eexda iyo Nacaybka Ku salaysan ee ka dhanka ah

Bulshooyinka Eeshiyaan Ameerikaanka ah,
Dhaladka Hawaii, Jasiirada Baasiga ah (AANHPI)

CRS waxay "Nabad ilaaliyaha Maraykanka" u tahay bulshooyinka colaaduhu ka dhex jiraan ayadoo dhex-dhexaadin ka samaysayn khilaafaadka korna u qaada awooda bulshada si qaab madax banaan looga hortago loona xaliyo iskudhacyada mustaqbalka imaan kara. Si waafaqsan qodobka Title X ee Sharciga Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka Ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., oo soo baxay 2009, CRS ayaa u gurmata bulshooyinka waajahaaya iskudhacyada ku salaysan kala-duwanaanshaha isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, ama naafada. CRS ma lahan awood sharci fulin ama awood dacwad oogis. Taas badelkeed, CRS ayaa qaab muhiim ah kala shaqaysa bulshooyinka rabshadu ka jirto si dib loogusoo celiyo xariirada, loo abuurto isfahan lagu wada qanco, loona dhiiri gesho abuurista xalal maxali ah. Dhex-dhexaadiyaasha CRS ayaa si toos ah ula shaqeeya saraakiisha gobalka iyo kuwa maxaliga ah, ururada bulshada, ururada u dooda bulshada iyo xaquuqda madaniga ah, kooxaha diinta, iyo sharci fulinta qaab iskaa wax u qabso ah. Wada hadal la Dhex-dhexaadiyaaya, talo bixinta, tababarka, iyo dhex-dhexaadinta CRS bixiso waa bilaash waana qarsoodi.

Ka fakar qaababka soo socda ee ugu haboon kuwaasoo ay kooxaha shaqaynaaya u adeegsan karaan abuurista qorshaha gurmada bulshada. Dukumiintigaan waxaa loo sameeyay kooxaha bulshada AANHPI, macalimiinta, hogaamiyaasha bulshada, iyo ururada sharci fulinta. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan abuurista qorsheyaasha gurmada bulshada, [halkaan guji](#).

Diyaari bayaanka bulshada oo midaysan kana dhan ah isir sooca iyo nacaybka. ▼

- ▶ Codkiina adinkoo ah madaxda la doortay, macalimiinta, iyo hogaamiyaasha bulshada ayaa awood badan leh. Adoo adkaynaaya muhiimad siinta kala-duwanaanta iyo wadajirka bulshadaada, waxaad gacan ka gaysan kartaa abuurista jawi ku dhisan dulqaad iyo midnimo ka dhan ah eexda iyo nacaybka.
- ▶ War-saxaafadeedyada dadwaynaha ayaa noqon kara qaab loogu xaqiijinaayo bulshada AANHPI inaad aqbalayn eex, nacayb, iyo rabshad. Iskuday inaad fariimahaan ku faafiso luuqadaha bulshada AANHPI iyo inaad ku faafiso dhammaan baraha warbaahinta ee u adeega bulshadaada. Raaci xog ku saabsan soo sheegista, gurmada, iyo taageerada dhibanaha.
- ▶ Bayaan bulsho oo midaysan ayaa ah qayb wayn oo kamid ah istaraatiijiyada. Waxaa intaas dheer, tixgeli:
 - Qorshaha faafinta fariinta iyo la xariirida warbaahinta si looga hortago dhacdada eexda ama nacaybka ku salaysan.
 - Diyaarinta qodobada laga hadlaayo ee la xariira kahortaga eexda nacaybka si loogu faafiyo warbaahinta.
 - U diyaarinta afhayeen si uu uga jawaabo su'aalaha saxaafada iyo dadka kale (ama kulan u qabo koox afhayeen ah).
- ▶ La kaasho bulshadaada qorista qabyo qoraalka xogta iyo qaabka fariintaada. Aruuri fikradaha ku aadan fariintaada wadajirka ah oo ka imaanaaya ururada xaquuqda aadanaha iyo kuwa bulshada u dooda.
- ▶ Iskaashi la samee ururada bulshada ee u adeegaaya bulshooyinka AANHPI si aad u faafiso una qaybiso bayaankiina wada jirka ah.

U.S. Department of
Justice Community
Relations Service
(Adeegga Xariirka
Bulshada ee
Waaxda Cadaalada
Maraykanka) (CRS)
waxay u diyaarsan
tahay inay adeegyada
siiso bulshooyinka
AANHPI si loo abuurto
qorsheyaasha
gaashaanka bulshada
si looga hortago
dhacdooyinka ku
salaysan eexda
iyo nacaybka.

Qabo kulan aad ku garab istaagayso bulshada oo loogasoo horjeedo nacaybka iyo eexda. ▼

- ▶ Marka ay haboon tahay ayna badqab tahay, munaasabadaha bulshada iyo kulannada oonleenka ah ayaa loo adeegsan karaa wacyi gelin ku aadan eexda iyo nacaybka saamaynta ku yeelanaaya bulshooyinka AANHPI.
- ▶ La wadaag khayraadka jira ee la xariira eexda nacaybka, sida gudiyada maxaliga ah ee xariirada aadanaha, barnaamijyada dugsiga, mashruucyada booliiska, iyo barnaamijyada ay taageeraan saamileeyda bulshada deegaanku.
- ▶ Fursad sii dhibaneyaasha, taageereyaasha, iyo iskaashatadu ay ku muujiyaan walaacyada ay ka qabaan eexda iyo nacaybka, sida kulanka bulshada, [wada hadalka la dhex-dhexaadinaayo](#), kulanka dhagaysiga ah, ama sanduuqa fariimaha iimeelka.
- ▶ Munaasabadaha isgarab-taaga ah ayaa tusi kara bulshada AANHPI inaysan keligood ku hayn halganka. Iskuday inaad ku casuunto saamileeyda kale sida hogaamiyaasha diinta, hogaamiyaasha bulshada, iyo booliiska.

U diyaar garoow qalalaase dhici kara, dhacdooyinka eexda ku salaysan, iyo danbiyada nacaybka. ▼

- ▶ Filo inay jiri karaan dhacdooyin keeni kara falal eex ah ama nacayb ku dhisan. [Bar](#) xubnaha bulshada hanraacyada soo sheegida, sharciyada danbiyada nacaybka, iyo farsamooyinka ugu wanaagsan ee loo difaaco goobaha cibaadada.
- ▶ U sheeg booliiska hanjabaadaha iyo falalka kale ee danbiyada dhici kara. La kulan booliiska si aad u ogaato waxyaabaha aad soo sheegayso iyo qaabka aad u soo sheegayso.
- ▶ Iskudubarid qorsheyaal aad raacayso marka xaalado degdeg ah yimaadaan sida qalalaase dadwayne, rabshad beefsi ah, danbiyada nacaybka ku salaysan, iyo mudaaharaadyada wadan kara rabshadaha.
- ▶ Ka feejignoow munaasabadaha bushooyinka AANHPI, korjoogtaynta, iyo fasaxyada saamaynta ku yeelan kara hawlaha kulanka iyo socdaalka.
- ▶ Hubi agabka iyo xariirada si aad u xaqiijiso [fahanka luuqada iyo baahiyaha turjumaada](#).
- ▶ Samee dulmar ku aadan qorshahaaga falcelinta si aad u aqoonsato xariirada maqan iyo meelaha u baahan in la hormariyo.
- ▶ U sheeg booliiska goobaha muhiimka ah ee la beegsan karo, ayna ku jiraan xaafadaha, goobaha shaqada, goobaha cibaadada, qunsuliyadaha, safaaradaha, qabuuraha, dhismeyaasha taariikhiga ah, iyo goobaha kale ee bulshada AANHPI iskugu yimaadaan.
- ▶ Adeegso luuqada ay ku talinayso CDC si aad ugu yeerto fayraska COVID-19. Booqo: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/your-health/about-covid-19/basics-covid-19.html>

Qaad talaabooyin aad ku yaraynayso dhibaataada eexda iyo nacaybku ku yeelan karaan faya qabka jirka iyo dhimirka ee kooxaha saamayntu ku dhacayso. ▼

- ▶ U sheeg kooxdaada shaqada inay la shaqeeyaan khubarada si loo xaqiijiyo fahan guud oo ku aadan goorta iyo qaabka khayraadka caafimaadka dhimirka loo adeegsan karo.
- ▶ Dadka qaar ayaa soo sheegay dhacdooyinka la xariira eexda ama nacaybka inay ka dhasheen ciladaha dhanka caafimaadka dhimirka. Kooxda ayaa la qabsan karta hanaannada booliiska deegaanka si loola shaqeeyo dadka looga shakiyo ciladaha dhanka caafimaadka dhimirka.
- ▶ Sii [khayraadka caafimaadka dhimirka](#) dhibaneyaasha iyo xubnaha bulshooyinka AANHPI ee waajahaaya nacaybka iyo eexda.
- ▶ Xaqiiji in shaqaalaha gurmada degdega ah iyo kuwa caadiga ahba ay heli karaan caafimaadka dhimirka iyo taageerada xanuunnada maskaxda oo ku filan.
- ▶ Xaqiiji in khayraadka marqaatiga iyo dhibanuhu ay dhaqan ahaan ku haboon yihiin laguna heli karo luuqada loo baahan yahay.

U diyaari dugsiyada iyo xarumaha jaamacadaha inay ka hortagaan dhacdooyinka eexda iyo nacaybka ku salaysan xili ay ardaydu kusoo laabanayaan dugsiga. ▼

- ▶ Ku dhiiri geli dugsiyada, kuleejka, ama jaamacada inay lahaadaan xeerka dhibaataaynta la isku mariyo oonleenta iyo dhibaataaynta tooska ah.
- ▶ U tababar booliiska xarunta qaababka ugu fiican ee soo sheegida dhacdada eexda iyo nacaybka iyo baaritaanka.
- ▶ La xariir ardayda AANHPI, ayna ku jiraan kuwa qaybta ka ah goobaha cilmi baarista.

Khayraadka ▼

Wararkii ugu danbeeyay iyo xogaha turjuman

<https://www.justice.gov/hatecrimes/addressing-hate-crimes-against-AAPI>

Adeegyada CRS ee bulshooyinka AANHPI

<https://www.justice.gov/crs/highlights/AAPI-hate-crimes>

Ilaaha Dheeraadka ah ee U.S. Department of Justice ▼

Tusmada danbiyada Nacaybka ku Salaysan

Laanta Danbi Baarista Federaalka
(Federal Bureau of Investigation)

Soo sheegista Danbiyada Nacaybka Ku dhisan –

Ka shaqaynta Buuxinta Duleelada Jira

Adeegyada Bulshadu Hagayso ee Ilaalinta Nabad-galyada

Kor u Qaadista Aqoonsiga iyo Soo sheegista Danbiyada
Nacaybka ku salaysan

Adeegyada Bulshadu Hagayso ee Ilaalinta
Nabad-galyada

Kor u Qaadista Aqoonsiga, baaritaanka,
iyo Soo sheegista Danbiyada Nacaybka ku salaysan :
Warbixinta Kooban ee Kulanka Booliiska

ee Adeegyada Bulshadu Hagayso ee Ilaalinta Nabad-galyada

Danbiga Nacaybka ku salaysan: Talaabooyinka Ficiilka ah ee
Bulshooyinka Maxaliga ah

Adeegyada Bulshadu Hagayso ee Ilaalinta Nabad-galyada

U adeegaaya Bulshooyinka inta lagu jiro aafada caabuqa
COVID-19

Community Relations Service (Adeegga Xariirka Bulshada)

Ka caawinta Bulshada Kahortaga iyo Gurmada ku aadan
Danbiyada Nacaybka Ku salaysan

Community Relations Service (Adeegga Xariirka Bulshada)

Jooji Nacaybka oo dhis Wadajir: Khayraadka Booliiska iyo
Iskaashatada Bulshada

Adeegyada Bulshadu Hagayso ee Ilaalinta Nabad-galyada

Markay jiraan xaalado degdeg ah wac 9-1-1 si aad u hesho gurmada degdeg ah. ▼

Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay dhibanaha danbi nacayb ku salaysan ama aad aaminsan tahay inaad goob-joog u ahayd danbi nacayb ku salaysan:

Talaabada 1: U sheeg fal danbiyeedka booliiska maxaliga ah.

Talaabada 2: Si degdeg ah u dabagal warbixinta adoo raacinaaya fariin ku socota Federal Bureau of Investigation (FBI) adoo wacaaya 1-800-CALL-FBI ama ku dir xogta ciwaanka tips.fbi.gov. Waad qararin kartaa magacaaga.

Hel adeegeena, nagu xirnoow ▼

www.justice.gov/crs

www.justice.gov/hatecrimes



facebook.com/DOJCRS/



[@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935